Mental Health Tribunal

Xuquuqdaada Dhagaysiga Maxkamad-yareyda

Waa Tuma Maxkamad-yareyda Caafimaadka Dhimirka?

Maxkamad-yareyda Caafimaadka Dhimirka (Maxkamad-yarey) waxaa lagu asaasay Sharciga *Mental Health Act 2014* (Act) si ay u siiso kormeer madaxbannaan dadka helaya daaweynta qasabka ah iyo inay yareyso xadaynta xuquuqda dadka.

Maxkamad-yareydu waxay booqataa adeegyada cafimaadka dhimirka si ay u qabato dhagaysiga. Maxkamad-yareydu waxay kaloo qabataa dhagaysiga ayadoo adeegsanaysa kulanka fidiyowga ah. Qayb kasta oo maxkamad-yareyda ah waxay leedahay saddex xubnood. Qareen, saykaataraist ama dhaqtarka daaweynta oo diiwaangashan iyo xubin bulshada ah.

Maxkamad-yareydu waxay go'aamisaa haddii qofku ay tahay inuu qaato daaweyn qasab ah. Maxkamaddu waa inay ku qanacdaa in dhammaan shuruudihii daaweynta ee Sharciga ku qoran inay khuseyso ka hor intaan la samayn Amarka Daaweynta.

Maxkamad-yareydu waxay kaloo qabataa dhagaysiyo si ay u go'aamiso in la ogolaado daaweynta electroconvulsive (ECT) duruufo xadidan oo keliya.

Waa maxay Dhagaysiga Maxkamad-yareyda Caafimaadka Dhimirka?

Dhagaysiga Maxkamad-yareyda waa kulan gaar ah oo lagu sameeyo go'aannada ku saabsan in shuruudaha daaweynta qasabka ah ay khuseyso qofka.

Waxaad xaq u leedahay inaad hesho dhagaysi caddaallad ah oo waqtiyeysan

Maxkamad-yareydu waxay qabataa dhagysiyada si caddaallad ah, qaab waqtiyeysan ah. Waa lagu ixtiraamayaa, lagaana qaybgeliyaa, laguna dhagaystaa inta dhagaysigu socdo fikraddaadu waa muhiim.

Dhagaysi caddaallad ah macnahiisu waa in lagu siiyo macluumaadka ay maxkamad yareydu tixgelin doonto laguna siinayo waqti kugu filan ka hor dhagaysiga si loo diyaariyo waxaad doonayso inaad tiraahdo. Adeegga caafimaadka dhimirka waa inuu ku siiyaa Warbixinta Daaweynta Qasabka ah oo ay ku siiyaan kooxda daaweynta ugu yaraan 47 saacadood ka hor dhagaysiga Maxkamad-yareyda. Inay duruuf gaar ah jiraan mooyee waxaad kaloo xaq u leedahay inaad hesho macluumaadka ku jira galkaaga kilinikada yaal ugu yaraan 48 saacadood ka hor dhagaysigaaga.

Waxaad u baahan tahay waqti si aad u samayso diyaargarowga matallaada sharciyeed ama in qof yimaado oo uu kaa taageero dhagaysiga. Haddii adigu ama qofka ku taageerayaa aysan iman karin dhagaysiga, waxaad la xiriiri kartaa Maxkamad-yareyda waxaadna codsan kartaa taariikhda cusub ee dhagaysiga. Maxkamad-yareydu waxay samayn doontaa waxay kari karto si ay u tixgeliso codsigaaga hase ahaatee Sharcigu wuxuu leeyahay waqti xaddidan ee marka la qabanayo dhagaysiyada iyo Maxkamad-yareyda.

Waa inay ku dhaqantaa xaddidaada waqtigan. Waxaad xaq u leedahay inaad timaaddo dhagaysiga si aad u sheegto fikraddaada

Waxaad xaq u leedahay inaad timaaddo dhagaysiga oo aad sheegto fikraddada. Waxaad soo wadan kartaa daryeelahaaga, xubnaha qoyskaaga ama saaxiibada si ay kuu taageeraan dhagaysiga. Fikradahaaga, doonisyadaada iyo baahiyahaaga waa u muhiim Maxkamad-yareyda markii ay go'aaminayso in la sameeyo iyo inaan la samayn Amarka Daaweynta ama in la ogolaado ECT. Haddii aad doorato inaadan iman, Maxkamad-yareydu waxay qaban kartaa dhagaysiga waxayna samanaysaa go'aanka adoo maqan.

Waxaad xaq u leedahay inaad hesho qareen ku matala

Waxaad go'aansan kartaa inaad hesho ama aadan helin qareen kugu matala dhagaysigaaga. Victoria Legal Aid waxay bixisaa adeegyo sharciyeed lacag la'aan ah kaysaska qaarkoodna, waxay kugu matali kartaa dhagaysigaaga. Xubnaha Maxkamad-yareyda weli waxay doonayaan inay si toos ah kuula hadlaan xataa markii qareenku uu ku matalayo.

Kala-xiriir Victoria Legal Aid taleefanka 1300 792 387 si aad u aragto wixii caawimaad ah oo ay ku siin karaan. Qareenada Victoria Legal Aid waxay kaloo si joogto ah u booqdaan isbitaallada iyo kilinikyada caafimaadka dhimirka bulshada.

Xarunta Mental Health Legal Centre waxay kaloo bixisaa talooyinka iyo adeegyada sharciyeed. Lambarka xiriirkoodu waa 9629 4422 iyo 1800 555 887 ee wacayaasha miyiga.

Waxaad xaq u leedahay inaad magacowdo qof macluumaadka kuu hela kuna taageera

Waxaad xaq u leedahay inaad qof u magacowdo, kaas oo noqon kara daryeele, xubin qoys ama saaxiib si uu kuugu helo macluumaadka uuna kuu taageero. Qofkaas waxaa loo yaqaan Qofka La-magaaabay. Qofka La-magaaabay wuxuu kaa cawin karaa inaad hesho xuquuqdaada aadna sheegto fikradahaaga iyo doonitaankaaga. Kooxda daaweyntaada waxay kaa siin kartaa macluumaad loo sameeyo Qofka Lamagacaabay.

Waxaad xaq u leedahay inaad macluumaad siiso Maxkamad-yareyda ka-hor dhagaysiga

Waxaad u soo qaadan kartaa Warbixintaada Maxkamad-yareyda iyo Caddayntaada Horraanta dhagaysiga.

Warbixintaada Maxkamad-yareyda waa foom kugu caawin karaa inaad u sheegto fikradahaaga Maxkamad-yareyda. Foomkja waxaa lagu soo diri doona asagoo la socda ogaysiinta dhagaysiga. Waxaad kaloo ka soo degsan kartaa website-ka Maxkamad-yareyda.

Caddaynta Horraanta waa dokumanti lagu siinayo si aad ugu qorto dookhyada daaweyntaada. Kooxda daaweyntaada waa inay tixgeliyaan dookhyada ku yaal caddayntaada Horraanta markii ay go'aaminayaan daaweyntaada.

Waxaad xaq u leedahay in dhaqankaaga ama baahiyahaaga gaarka ah in la tixgeliyo

Haddii adiga ama qofka ku taageeraya uga baahdo turjumaan dhagaysiga, fadlan ka codso adeegga caafimaadka dhimirka inay u sheegaan Maxkamad-yareyda inay kuu diyaariyaan. Turjumaanku wuxuu kugu caawin karaa adiga ama qofka ku taageeraya si aad si firfircoon uga hadashaan dhagaysiga. Uma baahnid inaad qarashkaas bixiso. Fadlan u sheeg adeegga caafimaadka dhimirka haddii aad leedahay baahiyo dhaqameed ama kuwa gaar ah.

Waxaad xaq u leedahay arimaha gaarnimada iyo qarsoodinimada

Dhagaysiga Maxkamad-yareyda way ka xiran yihiin dadweynaha guud. Taas oo macnaheedu tahay waxay keliya oo iman karaa dadka ku tabarucaya dhagaysiga.

Xubnaha iyo shaqaalaha Maxkamad-yareyda waxaa looga baahan yahay inay u hayaan macluumaadka kugu saabsan si qarsoodi ah.

Waxaad xaq u leedahay inaad codsato go'aan qoraal ah

Waxaad la xiriiri kartaa Maxkamad-yareyda si aad uga codsato sharaxaad qoraal ah ee go'aanka Maxkamad-yareyda. Taas waxaa loo yaqaan Caddaynta Sababaha. Codsiga Caddaynta Sababaha waa in lagu sameeyaa qoraal 20 beri shaqo gudahooda ka dib dhagaysigaaga.

Waxaad xaq u leedahay inaad racfaan qaadato

Waxaad Maxkamad-yareyda ka codsan kartaa dhagysiga mar kasta. Dhagaysiga waxaad u sharxi kartaa Maxkamad-yareyda waxaadan ugu baahnayn inaad Amar ku jirto. Foomamka codsiga waxaa laga helaa adeegga caafimaadka dhimirka. Foomamka codsiga waxaa kaloo lagala soo bixi karaa website-ka Maxkamad-yareyda. Shaqaalaha isbitaalka iyo kuwa kilinikada waxay kugu caawin karaan inaad soo buuxiso foomka. U-doodaha madax-bannaan ama booqdaha bulshada ayaa kaloo ku siin kara taageero si aad u buuxiso foomka una diyaarsato dhagaysiga.

Haddii Maxkamad-yareydu ay samayso Amarka Daaweynta ama Amarka ECT waxaad kaloo ka codsan kartaa Victorian Civil and Administrative Tribunal (VCAT) in dib loo eego go'aanka Maxkamad-yareyda. Waa inaad usoo gudbisaa codsigaaga VCAT 20 beri shaqo gudahooda ka dib go'aanka Maxkamad-yareyda.

Victorian Civil and Administrative Tribunal (VCAT)

Taleefanka	9628 9900 1300 079 413 (Wicid lacag la'aan ah ee wacayaasha miyiga oo keliya)
Email:	vcat-hrd@vcat.vic.gov.au
Website:	www.vcat.vic.gov.au

Waxaad xaq u leedahay inaad caawimaad ka hesho u-doodaha madaxbanaan ama booqdaha bulshada

Waa inaad kala hadashaa xuquuqdaada u-doodaha madaxbanaan ama booqdeyaasha bulshada.

U-doodaha Caafimaadka Dhimirka ee Madaxbannaan (IMHA) waa adeeg lacag la'aan ah, madaxbannaan oo qarsoodi ah oo la siiyo dadka ku qaadanaya daaweynta qasabka ah halkan Victyoria. U-doodeyaasha IMHA waxay ku caawin doonaan dadka qaadanaya daaweynta qasabka ah inay sameeyaan ayna ka qaybgalaan go'aannada ku saabsan qiimayntooda, daaweyntooda iyo bogsoodkooda.

Taleefanka:	1300 947 820
Email:	contact@imha.vic.gov.au
Website:	www.imha.vic.gov.au

Booqeyaasha Bulshada waa dad kuwaas oo booqda adeegyada caafimaadka dhimirka waxayna kaa caawin doonaan wixii su'aalo ah, waxayna ku hubsiin doontaa in si sharaf iyo xushmad leh lagu daryeelay oo lagu taageeray, iyo inay muujiso wixii arimo oo la qabo. Waxaad kala xiriiri kartaa Xafiiska U-doodaha Dadweynaha wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan booqdeyaasha:

Taleefanka:	1300 309 337
Email:	OPA_Advice@justice.vic.gov.au
Website:	www.publicadvocate.vic.gov.au/our-services/community-visitors

Waxaad xaq u leedahay inaad cabasho samayso

Koomisaariyaha Mental Health Complaints Commissioner (MHCC) waa haya'dda cabashooyinka caafimaadka dhimirka oo madaxbannaan taas oo ka caawisa dareenada iyo cabashooyinka ku saabsan adeegyada caafimaadka dhimirka dadweynaha.

Taleefanka:	1800 246 054 (Free call from landlines) ama 9032 3328
Email:	help@mhcc.vic.gov.au
Website:	www.mhcc.vic.gov.au

Haddii warcelintaada iyo cabashadaada ay ku saabsan tahay Maxkamad-yareyda, xubinta Maxkamad-yareyda ama shaqaalaha Maxkamad-yareyda, waxaad la xiriiri kartaa Maxkamad-yareyda ama soo buuxi *Foomka warcelinta iyo Cabashooyinka* kaas oo laga soo-degsan karo website-ka Maxkamad-yareyda.

Haddii aad qabto wax su'aalo dheeraad ah oo ku saabsan Maxkamad-yareyda caafimaadka Dhimirka, fadlan nagala soo xiriir:

Cinwaanka:	Level 30, 570 Bourke Street Melbourne Victoria 3000
Taleefanka:	9032 3200 ama 1800 242 703 (Wicid lacag la'aan)
Email:	mht@mht.vic.gov.au
Website:	www.mht.vic.gov.au